

Shattiyada Seattle

-qeyb ka mid ah taxanaha waaxyada-badan ee ku qoran adeegyada Magaalada iyo shattiyada

Tilmaamaha Xaalada Degdega ah ee Dabka

La Casriyeyay Noofembar 2021

Sida ay dhigayso Qaybta 403.10.2 ee Xeerka Dabdamiska Seattle, mulkiilaha ama maamulaha hantida la kireeyo waxaa looga baahan yahay inuu sameeyo oo uu qaybiyo Tilmaamaha Xaalada Degdega ah ee dabka. Tilmaamaha Xaalada Degdega ah ee Dabka waxay siiyaan shaqaalaha iyo dadka deegaanka ah qorshayaasha ka qixitaanka iyo macluumaadka ku saabsan helitaanka agabka dabka ee dhismaha.

Tilmaamaha Xaalada Degdega ah ee Dabka waxaa kamid ah:

- Goobta, shaqada iyo isticmaalka agabka ilaalinta dabka iyo agabka, oo ay ku jiraan nidaamka digniinta dabka, digniinta qiiqa iyo dab damiyayaasha gacanta lagu qaado.
- Meesha la marayo marka xaalada degdega ah looga baxayo guri kasta iyada oo la isticmaalayo jaran jarooyinka, oo lama isticmaalayo wiishka.
- Goobta banaanka ee ay iskugu imanayaan dadka degan dhismuhu.
- Tilmaamaha dadka kirada ugu jira ee aan awoodin inay ka baxaan dhismaha iyaga oo isticmaalaya jaran jarada.

Tilmaamaha Xaalada Degdega ah ee Dabka waa inay ka muuqdaan baahiyaha dadka degan dhismaha oo ayna u gaar noqdaan dhismaha.

Mulkiilaha dhismaha ama maamuluhu waa inay qiimeeyaan oo ay cusboonaysiiyaan tilmaamaha ugu yaraan hal mar sanadkii. Nuqul qorshayaasha ah waa in la siiyaa qof kasta oo kirada ugu jira marka ay usoo guuraan iyo marka isbadal lagu sameeyo.

Macluumaadkan ka khuseeyo dhismayaasha dhaadheer ee la degan yahay. Dhismayaasha dhaadheer ee la degan

yahay waxay u baahan yihiin Qorshayaasha Amaanka Dabka iyo Ka Qixinta Dadka. Si aad macluumaad badan uga ogaato, ama aad u go'aamiso hadii meel gaar ah oo in la tego ay u baahan yahay qorshayaal, booqo websaytka Qorshaha Amaanka Dabka iyo Qixinta Dadka ee (Client Assistance Memo, CAM) 5051 F:

www.seattle.gov/fire/firecode.

Hal qaab oo Tilmaamaha Dabdamiska Xaalada Degdega ahi waxaa weeye in la diyaariyo qorshe dhulka ah oo dabaq kasta ah oo u ogolaanaysa goobta agabka ilaalinta dabka iyo agabka ay heli karaan dadka deegaanku, oo ay ku jiraan nidaamka dab damiska, digniinta qiiqa iyo dab damiska gacanta lagu qaado. Qorshaha dhulka waxaa ka muuqan kara jidka xaalada degdega ah ee la marayo ee dhisme kasta.

Eeg Lifaaqa 1 ee Tilmaamaha Xaalada Degdega ah ee Dabka.

Khayraadka dheeraadka ah ee dabka iyo amaanka nolosha waxaa lagu heli karaa onleyn ahaan www.seattle.gov/fire/safety-and-community.

ISKA BARI YEELIDA MASUULIYADA SHARCIGA: Foomkaan Macluumaadka Caawimaada Macmiilka (CAM) looma adeegsan karo inuu badal u noqdo xeerarka iyo qaanuunada. Shakhsiyaadka waxay mas'uul ka yahiin u -hoggaansamida dhamaan sharuudaha xeerka iyo sharciyada, haddii lagu sharaxay CAM ama haddii aan lagu sharaxin.

Lifaaqa 1:**Tusaalaha Tilmaamaha Xaalada Degdega ee Dabka****Agabka Amaanka Dabka Dhismaha**

- Dhismuhu waxa uu leeyahay jalaska dabka iyo nidaamka biyaha dab damiska ee raacsan saqafka.
- Dab damiska gacanta lagu qaado ayaa yaala dabaq kasta oo waxaana ku xiga meesha laga baxayo iyo jalaska dabka meesha laga taabanayo kuwaas oo ku yaal gidaarka jaran jarada laga baxayo agtiisa ah.

Digniin kasta waa in loola dhaqmaa xaalad degdega ah oo dabka ah. Marka aad maqasho jalaska dab ama hadii aad dareento qiiq ama dab, waxa aad qaadaa talaabooyinkan si aad u xaqiijiso amaan uga qixida dhismaha.

1. Waxa aad uga baxdaa dhismahaaga sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah, oo waxaad xidhaa albaadada marka aad ka baxayso. Waxa aad gujisaa jalaska digniinta dabka ee ku yaal gidaarka u dhaw meesha laga baxayo hadii aanu baxaynin jalaska digniinta dabku.
2. Isticmaal jaran jarada, oo ha isticmaalin wiishka, si aad uga baxdo dhismaha.
3. Marka aad banaanka u baxdo, waxa aad ka fogaataa dhismaha oo waxa aad qabataa meeshii loogu talo geley in lagu kulmo. Ha iskugu imanina qaybta laga soo galo dhismaha. Meesha lagu kulmayaa waxaa weeye koonaha NE ee dhulka baarkinka.
4. Haddii aad arago qiiq ama dab banaanka gurigaaga ah oo aanad isticmaali karin jaran jarada, waxa aad ku jirtaa gurigaaga. Hakuu xidhnaadaan albaabka iyo daaqaduhu. Isticmaal tuwaalo ama dhar si aad ugu gufayso albaabka ama faamalaydhka meelaha uu qiiqo kasoo galayo.
5. Marka aad ka baxdo dhismaha, haku noqon dhismaha waxay doonto ha noqoto sababtu e ilaa inta Waaxda Dabdamisku ay bixinayso ogolaanshaha in lagu noqon karo.

